

## Ku soo wargeli maqnaanshaha ilmahaaga dugsiga adeegga elektarooniga ee Skola24

Dugsiyada degmadu waxay isticmaalaan adeega elektarooniga ee Skola24. Skola24, waxaad ku soo sheegi kartaa maqnaanshaha, waxaad ka codsan kartaa fasax, waxaad ka arki kartaa jadwalka iyo maqnaanshaha carruurta aad mas'uulka ka tahay.

### **Samee oo ku soo wargeli maqnaanshaha**

Maadaama aad tahay qofka mas'uulka ah waxaa jira laba hab oo aad u isticmaali karto Skola24 – inaad isticmaasho kumbuyuutar/Ipad/mobiil oo aad ka gasho internetka ama appka Unikum Family. Markaad u baahan tahay inaad soo sheegto maqnaanshaha oo keliya waxa fudud inaad isticmaasho appka Unikum Familj. Macluumaaadkaaga ayaa si otomaatiga ah ugu wareegaya nidaamyada ka kale, tusaale ahaan Tempus, oo aad isticmaalaysa haddii ilmuu aado dugsiga xilliga firaaqada (fritidshem). Ha ilowin inaad soo sheegto maqnaanshaha maalin kasta oo ilmahaagu ka maqan yahay dugsiga.

### **Fursado badan ayaa ku jira adeegga elektarooniga ah ee Skola24**

Adeegga elektarooniga ee Skola24, waxa ku jira fursado badan oo aan ahayn ku soo wargelinta maqnaanshaha oo keliya. Halkaa wax baad ka beddeli kartaa, fasax ayaad wakhti hore ka codsan kartaa, jadwalka ayaad ka arki kartaa iyo maqnaanshaha wakhti ka dib. Maadaama aad tahay qofkii mas'uulka ahaa waxaad kombuyutarka/Ipadka ama mobiilka ka geli kartaa: [www.umea.se/skolportal](http://www.umea.se/skolportal). Waxed isticmaalaysaa aqoonsigaaga elektaroonigga ah si aad u gasho. Haddii ay jirto sabab aanad u isticmaali karin BankID, la xiriir maamulka dugsiga.

Haddii ciwaanka iimaylkaaga ama lambarka mobiilkaagu uu ka maqan yahay Skola24, waa muhiim inaad dib u cusboonaysiiso borofiiinkaaga hoostiisa si aad u hesho wargelinta maqnaanshaha ee ilmahaaga. Waxed beddeleysaa borofiiinkaaga kadibna waa kaydinaysaa macluumaaadka la gaala soo xiriirayo.

Bogga [www.umea.se/skolportal](http://www.umea.se/skolportal) Waxed ka heli doontaa macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada elektaroonigga ah ee dugsiga. Dabcan dugsigaaguna sidoo kale wuu ku caawin karaa.

### **Macluumaaad ka socda dugsiga oo khuseeya appka Unikum Family**

Unikum waa madal uu dugsigu leeyahay halkaas oo maadaama aad tahay qofkii mas'uulka ahaa aad ka heleyso macluumaaad dulmar guud oo ku saabsan horumarka aqoonta iyo sidoo kalena aad ku soo wargelin karto maqnaanshaha ilmahaaga. Istimaal ereyada "Unikum Familj" ee Google Play (Android) ama App Store (iOS) ama koodka QR ee hoose:



Hämta Unikum familj till iPhone (iOS) Hämta Unikum familj till Android



Haddii aadan horay u soo galin, dooro "Habab kale oo aad ku gasho" kadibna dooro "degmada Umeå ee mas'uuliyiinta". Unikum Family waxa lagu heli karaa af Iswiidhish iyo Ingiriis.

Warbixin dheeraad ah: [YouTube - Unikum familj](#)